



# Your Cash and Food Assistance Rights and Responsibilities (Xuquuqda iyo Masuuliyadaha Kaashkaaga iyo Caawimadaada Cuntada)

MAGACA MACMILKA (MADAXA QOYSKA)
LAMBARKA AQOONSIGA MACMILKA

## Masuuliyadahaaga (Waxa Waajib kugu ah)

- **Inaad nasiisid macluumaad aan u baahanahay si aan u go'aansano inaad ku haboon tahay.**
- **Inaad nasiisid cadeyn marka loo baahdo.** Waxa laga yaabaa inaan awoodno inaan kuu helno. Macluumaadka aad siisay waaxda waxa la marinayaa xaqiijinta masuuliyiinta Faradaalka iyo gobolka. Xaqiijinta waxa ku jiri kara xidhiidhada dabogalka ee shaqaalaha waaxda oo ay ku jiraan baadhayaasha wax-is-dabomarinta.
- **Macluumaadka loo gudbiyo Department of Social and Health Services (Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka)** waxay saameyn karaan caymiska daryeelka caafimaadka ee ay maamulaan Health Care Authority (Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka) Isbadelka Kabka Caafimaadka.
- **Inaad soo sheegtaa isbadelada** (sida ciwaanka, dakhliga, iwm) sida uu dhigayo WAC 388-418-0005. Soo sheeg 10<sup>ka</sup> bisha xigta.
- **Inaad la shaqaysaa Division of Child Support (Qeybta Kaalmada Caruurta, DCS)** haddii aad aqbashid maalgalinta TANF. Waa inaad ka caawisaa DCS inay dejiso, wax ka badesho, ama xoojiso kaalmada caruurta ee ilmaha (ciyaalka) daryeelkaaga ku jira, oo aad noqotaa waalid (haddii ay daruuri tahay) sida uu dhigayo WAC 388-422-0005. Waxaad diidi kartaa inaad la shaqaysid DCS haddii aad muujin kartid inaad haysatid sabab macquula oo lagu aamino in la shaqeynta DCS kugu keenayso adiga, caruurtaada, ama caruurta ku jirta daryeelkaaga khatar waxyeelo oo ka timaad waalidka aan korinayn.
- **Inaad codsatid** oo aad sameysaa dadaal macquula si aad uga heshid dakhliga ilaha kale markaad codsatid ama aad heshid caawimo lacag ah.
- **Inaad dhammeystirtid warbixinaha iyo dibu eegista loo baahan yahay.**
- **Inaad raacdid shuruudaha** caawimada lacagta iyo caawimada cuntada.
- **Inaad noo sheegtid** haddii aad rabtid in qof kale isticmaalo caawimada cuntaada isagoo ku matalaya.
- **Inaad la shaqaysid dibu eegistada Xakameynta Tayada.**
- **Inaad isticmaashid caawimada cuntada** kaliya u iibi cuntada xubnaha qoyskaaga.
- **Inaad u isticmaashid caawimada** kaliya kabka xubnaha qoyskaaga.
- **Waa inaad bixisaa Social Security Numbers** (Lambarada Adeega Bulshada, SSN) ama xaalada qaxoonti ee dadka codsanaya caawimada. Haddii aad dooratid in aanad bixin SSNs ama xaalada qaxoonti ee xubnaha qoyska ee aan codsaneyn, dakhliga dhammaan xubnaha qoyska iyo khayraadka waa in lasoo xaqiijiyaa, haddii loo baahdo, si loo go'aamiyo kuhaboonaanshaha.

## Xuquuqahaaga (Waxa Waajib nagu ah)

- **Inaan ku aqbalno codsiga** magacaaga, ciwaankaaga, iyo saxeexaaga ama saxeexa wakiil ku matalaya oo la ogol yahay.
- **Inaan kaa caawino buuxinta foomamka DSHS.**
- **Inaan ku diyaarino** codsigaaga caawimada cuntada todoba (7) maalmood gudohood haddii aad ku haboon tahay adeega.
- **Inaan ku siino rasiidhka** haddii aad codsatid mid marka aad bixinaysid dhukumentiyada.
- **Inaan ku siino go'aan qoraal ah**, inta ugu badan, 30 maalmood gudohood.
- **Waxaad diidi kartaa inaad la hadashid baadhaha Fraud Early Detection** (Ogaanshaha Wax Isdabo-marinta, FRED) ee ka socda Office of Fraud and Accountability (Xafiiska Wax Isdabo-marinta iyo Isla-xisaabtanka). Maaha khasab inaad u ogalaatid baadhaha gurigaaga. waxaad ka codsan kartaa baadhaha inuu soo noqdo wakhti kale. Tani ma saameynayso ku haboonaanshahaaga caawimada.
- **Waxaad codsan kartaa dhageysi maamul** haddii aad ku khilaaftid go'aanka waaxdu ka qaadato kiiskaaga. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa kormeere ama maamule inuu dib u fiiriyo khilaafka go'aanka ama tallaabada iyadoon saameyneyn xuquuqdaada dhageysiga maamulka.
- **Waxa aan kuu sheegeyaa** ee sharciga xadiaadada wakhtiga 60 bilood oo hoos yimaada barnaamijka Temporary Assistance for Needy Families (Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan, TANF) iyo 4 bilood xadidaad wakhti ah oo hoos yimaada barnaamijka Refugee Cash Assistance (Kaalmada Lacagta Qaxootiga, RCA), oo ka bilaabma taariikhda kowaad ee ay dhamaatay u qalankaaga gunooyinka qaxootiga. Xadidnaanta wakhtigani kaliya waxay khusaysaa Basic Food (Cuntada Asaasiga ah), ama kabka daryeelka caruurta.

## Waxyaabaha Aad Ka Ogaanaysid Kaadhkaaga EBT

- **Isticmaalka Qaldan ee Kabka:** Kabka cuntada iyo lacagta kaashka ee lagu bixiyey kaadhka EBT wuxuu siin doonaa DSHS tixraaca dhaqdhaqaaqa halka aad ku isticmaashay kabkaaga. Waaxdu waxay u isticmaali doontaa macluumaadka dhaqdhaqaaqa baadhitaanada isticmaalka qaldan ee caawimada kabka kaashka ama iskubadelka kabka caawimada cuntada ee lacagta ama shay kale oo leh qiimo (qaadista).
- **Badellka kaadhka EBT:** Waxa laga yaabaa inaan lacag kaaga qaadno badelista kaadhka EBT. Ilaali badqabka iyo amniga kaadhkaaga EBT iyo personal identification number (furaha sirta ee gaarka ah, PIN).
- **Hadhaaga Badan ee Kaadhka EBT:** Haddii aanad isticmaalin kabkaaga mudo billo ah ama aad ku urursatid hadhaaga dhowr bilood kadib, waxa macquula inaan kulasoo xidhiidhno si aan dib ugu fiirino xaaladaada ama baahidaada kabka.

### Waxyaabaha Aad Ka Ogaanaysid (Basic Food (Cuntada Asaasiga ah))

- **Waxaanu u diraynaa macluumaadka** khuseeya dadka codsanaya Basic Food (Cuntada Asaasiga ah) wakaaladaha kale ee Fadaraalka si loo hubiyo in macluumaadku sax yahay. Haddii macluumaadka wax qalad yihiin, dadka codsadaa ma heli karaan Basic Food (Cuntada Asaasiga ah) Haddii qof bixiyo macluumaad uu og yahay inuu qalad yahay, waxa lagu oogi doonaa danbi. Ganaaxyada jabinta shuruudca Basic Food (Cuntada Asaasiga ah) ee kutalagal ah waxay iskugu jiraan kasaarida barnaamijka, ganaaxyo, ama xabsi.
- **Haddii aad iibisid, iskudaydi inaad iibisid, ku badeshid ama ugu deeqdid caawimada cuntaada** shay kale oo qiimo leh sida lacag, daroogo, hub, ama waxkale oo aan ka ahayn cuntada aad ka helaysid tafaariiqle la ogol yahay (tahriibin), waxa lagaa saari karaa helitaanka kabka caawimada cuntada mudo ugu yaraan hal sano ah ilaa ugu badanaan abidkaa in lagaa mabnuuco marka danbiga koobaad uu yahay. Kasaaristu way sii soconaysaa xataa haddii aad ka tagtid Gobolka Washington oo aad ka codsatid kabka gobolada kale.
- **Haddii lagaaga baahan yahay inaad ka qeybgashid shuruudaha Basic Food (Cuntada Asaasiga ah)**, oo aad ku guul daraysatid kaqeybgalka, waxa lagaa saari karaa mudo hal bil iyo ilaa aad u hogaansantid shuruudaha shaqada ee ku guul daraysiga; saddex bilood iyo ilaa aad u hogaansantid ku guuldaraysiga labaad; iyo lix bilood ilaa aad u hogaansantid marka saddexaad iyo wakhti kasta oo ka danbeeya intaas.
- **Waxa lagaa saari karaa banraamijka Basic Food (Cuntada Asaasiga ah)**markaad jabisid shuruudca barnaamijka Basic Food (Cuntada Asaasiga ah) sida lagu sheegay digniinta ganaaxa Basic Food (Cuntada Asaasiga ah) ee lagu xusay boggan.
- **Usoo sheeg kharashaadka qoyska haddii aad rabtid waaxdu inay ku darto kharashaadkan Basic Food (Cuntada Asaasiga ah).** Haddii aanad usoo sheegin oo aanad keenin cadeynta kharashaadkan, kadib waxaad sheegaysaa in aanad rabin inaan isticmaalno kharashaadkan si aan u go'aamino haddii aad rabtid inaad heshid Basic Food (Cuntada Asaasiga ah) oo dheeriya.

### Waxyaabaha Aad Ka Ogaanaysid (Kaashka - TANF)

#### Helitaanka Temporary Assistance for Needy Families (Caawimada Kumeel-gaarka ah ee Qoysaska Baahan, TANF)

waxaad u astanaysaa ilmahaaga ama xaaskaaga/saygaaga Division of Child Support (Qeybta Kaalmada Caruurta). Tani waxay ka dhigan tahayin DCS ay celin karto taageerada (raagitaan) oo uruura iyada aad qaadanayso TANF. DCS waxay kuu soo diri doontaa taageerada wakhtigan aad qaadata adiga oo qaadanaya TANF.

- **Waa inaad u sheegto DCS markaba hadii ilmahaagu u helo lacag taageero ama gunooyin** ilmaha loogu talo geley iyada uu qaato sidoo kale TANF.
- **Haddii aad joojisid helitaanka TANF** waa inaad u sheegtaa DCS isbadelada saameynaya kaalmada ilmahaaga, sida ilmuhu aanu kula deganayn ama cinwaankeega aad bedeshay.
- **Haddii aad heshid TANF waxaad codsan kartaa lacag dheeriya** si ay kaaga caawiso inaad bixisid kharashaadka guriga kulmeergaarka ah.

### Waxyaabaha Aad Ka Ogaanaysid (Kaashka - RCA)

#### Marka aad hesho Refugee Cash Assistance (Kaalmada Lacagta Qaxootiga, RCA):

- **Waa inaad tahay ruux kali ama leh xaas oo aan lahayn caruur.** Waa inaad noo sheegtaa hadii aad uur qaado ama ay tahay inaad ilmo koriso maadaama oo aad u qalmi karto barnaamij guno lacageed oo kale.
- **Waxa aad u qalantaa inaad qaadata ilaa 4 bilood Kaalmada Lacagta Qaxootiga** taas oo ku salaysan xaalada soo geleyti iyo taariikhda aad u qalantay barnaamijyada iyo adeegyada qaxootiga ee federalka.
- **Waa inaad ka qayb gashaa shaqaalaysiinta iyo adeegyada tobobarka** 30 maalmood gudahood marka lagu bilaabo, oo waxaa kamid noqon kara hawlaha kaa caawinaya inaad hesho shaqo ama inaad barato Ingiriisi. Waxaa dhici karta in aanad ka qayb galin adeegyadan hadii aad qabto laxaad la'aan daran ama mudo dheer ah, inaad u joogto guriga si aad u daryeesho ruux kale oo wayn oo laxaad la', aad tahay 60 jir ama ka wayn tahay, ama aad tahay dhibane tacadiga qoyska.
- **Waxaa kamid ah adeegyada shaqaalaysiinta iyo tobobarka ee waajibka ah**, waa inaad qabato dhamaan waraysiyada shaqo, aqbasho shaqada macquulka ah ee lagu siiyay (iyada oo kahor imanaysa moojee heshiiska ururka shaqaalaha ee aad xubinta ka tahay ama shaqada ay u banaan tahay mudaharaad shaqaale), oo ma joojin kartid shaqada hadii aanad haynin sabab wanaagsan, marka aanu eegno.
- **Waxa aad xaq u leedahay shaqo haboon iyo adeegyada shaqaalaysiinta iyo tobobarka.** Dhamaan shaqooyinka iyo adeegyada shaqaalaysiinta iyo tobobarka waa inay noqdaan amaan, bilaa takoor, waxaa kamid ah hawlaha ku jira baaxada shaqada ee shakhsiyaadka la shaqaalaysiinayo / qorshaha adeega waxbarashada oo aad u qabanayso si joogto ah, saacadaha shaqada ee caadiyan loogu talo geley shaqada, oo waa in wakhti macquul ah loo socon karaa (ayna ka badnayn laba saacadood ama ta laga ogol yahay aaga). Adeegyada tobobarka waxay u badan tahay inay horseedaan inaad hesho shaqo oo mushaharkuna waa inuu noqdaa ama ka badan yahay mushaharka ugu yar ama waa in aanu aad uga yaraan waxa caadiyan lagu qaato shaqooyinka lamidka ah.
- **Waxaa kugu waajib ah inaad aqbasho shaqo ama inaad ka qayb gasho adeegyada shaqaalaysiinta iyo tobobarka RCA**, oo hadii aad sidaa samayn waydo, kaalmadaada waa la joojin ama yarayn doonaa. Yarayntu waxaa weeye sadex bilood oo ka bilaabanta wixii aan ka qayb galka ahayn ee ugu horeeya iyo lix bilood wixii aan ka qayb gal ahayn ee kasta ee ka danbeeya.
- **Waa inaad noogu soo sheegto wixii dakhli ah ee aad ka hesho shaqo** 10ka bisha ee xigta.
- **Haddii aad qabto laxaad la'aan, indho la'aan, ama ka wayn tahay 65 jir**, waxa aad heli kartaa RCA inta aad dalbanayso barnaamij kaalmo oo kale oo aad ka dalbato Social Security Administration (Maamulka Sooshaal Sekuuritiga, SSA). Waxa aanu kaa caawin doonaa dalbashada barnaamijyadan. Marka lagu ansixiyo barnaamijka kaalmada ee SSA, gunooyinkaaga RCA way joogsan doonaan.
- **Ma heli kartid RCA** hadii, 30 maalmood gudahood kahor ka qayb galkaaga aad joojiso shaqada ama aad diido shaqada macquul ah ee lagu siiyay bilaa sabab wanaagsan.

Iyadoo la raacayo sharciga shacabka ee fadaraalka U.S. Department of Agriculture (Waaxda Mareykanka ee Beeraha, USDA) qawaaniinta iyo siyaasadaha shacabka, haayadani waxa laga mabnuucay takoorka ku saleysan isirka, midabka, dhalashada, jinsiga (oo ay ku jiraan aqoonsiga jinsiga iyo rabitaanka galmo), caqiidada diimeed, naafada, da'da, aragtiyaha diimeed, ama aargoosi ama aargoosasho ka hor dhaqdhaqaaq xuquuq shacab.

Macluumaadka barnaamijka waxaa laga yaabaa in lagu diyaariyo luuqado aan Ingiriisi ahayn. Dadka naafada ah ee u baahan hab kale oo isgaadhsiineed si loo helo macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan farta indhoolaha, far waaweyn, cajalad maqal, Luuqadda Calaamadaha ee Maraykanka), Waa inay la xidhiidhaan wakaaladda (gobolka ama degaanka) halkaas oo ay ka codsadeen kabka. Shakhsiyadka dhagoolaha ah, maqalku ku adag yahay ama qaba naafonimada hadalka waxay la xidhiidhi karaan USDA iyadoo u maraya Adeegga Gudbinta Federaalka ee (800) 877-8339.

Si aad u gudbisid cabasho takoor, Dacwooduhu waa inuu dhammeystiraa foomka AD-3027, USDA Foomka Barnaamijka Dacwoodaha Takoorka waxa laga heli karaa onlaaynka: <https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf>, xafiiskasta oo USDA ah, adoo wacaya (833) 620-1071, ama warqad qoraal ah ku hagaaji USDA. Warqadani waa inay ka kooban tahay magaca, ciwaanka, teleefan lambarka, dacwoodaha iyo sharaxaad qoraalka falka takoorka lagu eedeeyey oo faahfaahin ku filan leh si loo ogeysiiyo Assistant Secretary for Civil Rights (Kalkaaliyaha Xog-hayaha Xuquuqda Dadweynaha, ASCR) nooca iyo taariikhda jabinta xuquuqda lagu eedeeyey. Foomka la dhameystiray AD-3027 ama warqada waa in loo gudbiyo:

1. **Boosto:** Food and Nutrition Service, USDA  
1320 Braddock Place, Room 334  
Alexandria VA 22314;
2. **Faakis:** (833) 256-1665 or (202) 690-7442; ama
3. **limeelka:** <mailto:FNSCivilRightsComplaints@usda.gov>

Hay'adani waa bixiye fursad loo siman yahay.

Anoo saxeexaya hoos, waxaan xaqiijinayaa inaan helay xuquuqdayda iyo masuuladahayga helitaanka kabka DSHS iyo barnaamijyada oo la ii sharxay. Waxaan fahmay in haddii aan diido inaan saxeexo dhukumentigani aanay saameynayn ku haboonaanshahayga laakiin wali aan masuul ka noqon doono shuruudaha barnaamijka oo aan waajihi karo ganaaxa barnaamijka ama danbiyada qabanaya.

TAARIIKHDA SAXEEXA	CODSADAHA	TAARIIKHDA SAXEEXA	CAAWIYAHA-CODSADAHA
--------------------	-----------	--------------------	---------------------

DSHS AQOONSIGA SHAQAALAHA:

Diiday inuu saxeexo.